

# Dhaqso Ugu Dhaqaaq Si aad U Hesho Daawooyinka COVID-19 - Qoraal

[muusig kicin leh]

[qoraalka shaashada] Ma maqashay?

[warin] Haddii aad la xanuunsan tahay COVID-19, inaad daawo qaadato ayaa ka caawinaysa jirkaaga inuu la dagaalamo fayraska si aad degdeg ugu bogsooto.

Daawooyinka, oo ay ku jirto Daawada Difaaca Jirka ee macmalka ah (Monoclonal Antibody Treatment), waxaa loogu talagalay dadka laga helo cudurka qabana astaamo fudud ilaa kuwo dhex dhexaad ah. Waxay kaa celin karaan inaad si daran ugu jirato fayraska oo aad u aaddid cisbitaalka.

Waxaad keliya ku qaadan kartaa daawo inta lagu jiro 10 maalmood ee ugu horeeya aad qabto astaamaha COVID-19, marka waa muhiim inaad dhakhso leh ugu dhaqaaqdo.

Booqo [health.mn.gov/covidmeds](https://health.mn.gov/covidmeds) ama la hadal daryeel caafimaad bixiyahaaga si aad u hubiso in aad u qalmi karto aadna u hesho xarunta caafimaad ee kuu dhaw. Waxaad sidoo kale wici kartaa khadka caawimaada ee Minnesota oo ah 1-800-657-3504, Isniinta ilaa Jimcada laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 4 galabnimo., si laguugu xiriiriyo xarunta.

[muusig kicin leh]

Minnesota Department of Health  
Communications Office  
PO Box 64975  
St. Paul, MN 55164-0975  
651-201-4989  
[health.communications@state.mn.us](mailto:health.communications@state.mn.us)  
[www.health.state.mn.us](http://www.health.state.mn.us)

3/10/21 (Somali)

*Si aad xogtaan ugu hesho qaabab kale, wac: 651-201-4989*